

KHAD JOOGTO AH



Metro Bus waxay howlgelisaa adeega baska ee St. Cloud, Sartell, Sauk Rapids & Waite Park.

Adeega baska ee Khad Joogto ah waxa uu ku socdaa jadwal dhegan iyo jid cayiman. Cid kasta waa u furanyahay.

KHARASHKA BAS RAACA

Lacag kaash ah | Tookin | Kaarka Baska

Diyaarso lacagta baska inta aadan baska fuulin.

Lacag Kaash ah: Ku bixi baska gudahiisa. Sanduuqa bixinta lacagta wuxuu qaataa qadaadiic iyo lacagta illaa \$20 laakiin lagu soo celin maayo lacag baaqi ah. Baaqiga waxaa lagugu siin kaar ahaan aad ku isticmaali kartid bas raacida danbe.

Tookin ka Baska: Waxaad ka iibsan kartaa Xarunta Gaadiidka oo keli ah.

Kaarka 10 Jeer Bas Lagu Raaco: Waxaa laga heli karaa Xarumaha Gaadiidka iyo inta badan dukaamada cuntada laga adeegto. Waxaa loo isticmaali karaa 10 bas raacid, wakhti kasta, mana dhacayo kaar ku.

Kaarka 1-Cisho Bas lagu Raaco: Waxaa laga heli karaa baska gudahiisa iyo Xarumaha Gaadiidka. Waxaa loo isticmaali karaa bas raacid aan xadidnayn maalintaas. Looma baahna kaarka baska kale loogu gudbo.

Kaarka baska ee 7-cisho & 31-cisho Lagu Raaco: Ayaa laga helayaa xarunta gaadiidka iyo inta badan dukaamada adeega cuntada. Waxaa loo isticmaali karaa bas raacid aan xadidnayn maalmaha isku xiga laga bilaabo maalinta ugu horaysa ee kaadhka la isticmaalo. Looma baahna in aad qaadato kaarka bas kale loogu gudbo.

Kaarka Baska kale loogu gudbo: Ayaa la siin qof kasta oo bixiyay lacagta bas raaca oo bixiyay lacag kaash ah, tooken ka baska, ama kaarka baska ee u baahan in ay bas kale sii raacaan. Kaarkan wuxuu shaqayn laba saac iyo badh.

Bas Raac Qiimaha laga Dhimay: Ayaa la siinayaa dadka jira 65 iyo wixii ka weyn, dadka naafada ah, dadka haysta Kaarka Metro Bus Freedom, Dadka Haysta Kaarka Medicare, iyo dadka kale ee haysta karaar kale oo la ogolyahay saacadaha aan jaamka ahayn (Isniin - Jimce 8:40 AM - 3:40 PM iyo 5:40 PM - 10:00 PM, iyo Sabtida & Axada maalinta oo dhan).

Bas Raac Bilaash ah: Ayaa la siinayaa ilaa laba caruur ah oo jirta shan sano iyo wixii ka hooseeya ee ay la socdaan qof isagu bixiyay noolkiisa, howlgabka milatariga iyo dadka iyaga daryeela ee la socda iyaguna waa bilaash.

ADEEGA DIAL-A-RIDE

Dial-a-Ride waa adeeg bas raac la wadaago oo loogu talagalay dadka naafada ah ee aan isticmaali karin basaska Khad Joogto ah. Waa in dadka isticmaalaa ay maraan borosiis lagu hubinayo in ay xaq u leeyihiin.

Si aad wax uga ogaato habkan Xaqiijinta soo wac taleefanka **320.252.1010**, booqo **ridemetrobus.com** ama imoow xarunta **Mobility Training Center** ee ku taalla downtown St. Cloud.

320.251.RIDE(7433)
ridemetrobus.com

METRO BUS
the people picker-uppers.



Wiishka wax qaada, sagxada lagu fuulo iyo kursiga naafada ayaa loo hayaa dadka u baahan caawinta dhanka socodka.

Dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ah ayaa mudnaanta leh in ay kursiga ku fadhiistaan.

Waa in baska looga dego ama laga raaco **meesha loogu talagalay in basku istaago.**

Imoow meesha baska laga raaco **shan daqiiqo** ka hor inta uuna basku soo istaagin.

Kasoo bax goobta baska lagu sugo marka uu basku soo dhowaado si qofka baska wadaa kuu arko.

Basaska oo dhan waxaa ku xidhan meesha **baaskiilka lagu xidho** (laba meelood baskiiba).

SAACADAHA XARUNTA GAADIIDKA

Haabka jidadka Basaska Metro Bus iyo adeegyadooda

510 1st St. S. Downtown St. Cloud

Isniin - Jimce: 5:00 AM - 10:00 PM

Sabti: 7:45 AM - 7:00 PM

Axad: 8:45 AM - 6:30 PM

Feestada: Wuu xidhanyahay maalintii oo dhan maalmaha New Year's Day, Memorial Day, Independence Day, Labor Day, Thanksgiving Day, iyo Christmas Day. Wakhti hore ayaa la xidhaa habeenka Christmas soo galayo.

ILAHA

Taleefano muhiim ah

Jadwalka/Alaabta Luntay ee la Helo 320.251.RIDE (7433)

Talo Soo Jeedinta Macaamiisha 320.258.6886

Maamulka 320.251.1499

ridemetrobus.com

Qalabka Qorshaynta Safarka: Jidka iyo akhbaarta safarka meel tegista iyo kasoo laabashada.

Fiidyowyo ku Saabsan Sida Loo Raaco: Oo la heli karo iyagoo luqadaha English, Spanish iyo Somali ah.

Jidka iyo Jadwalka: Macluumaad cusboon oo ku saabsan jidka.

Wargelin & Beddelida waddada: Macluumaad ku saabsan marka jidka la bedelo.

Tababar ku saabsan sida loo raaco

Tababar bilaash ah oo qof kasta la siin karo sida dadka waaweyn iyo kuwa yar yar, dadka naafada ah & dadka luqada Ingiriiska wax yar ka yaqaana. Si aad u ogaato fasalada barashada bas raaca, lasoo xidhiidh **Mobility Training Center** at 320.529.4497.

Baraha bulshada kala soco Metro Bus



@StCloudMetroBus



@scmetrobus

08/18